

# Waxa la filan karo marka Dhakhtarka Cilmi-Nafsiga Waxbarashada uu ku lug yeesho ilmahaaga inta uu joogo dugsiga



## Macluumaad loogu talagalay waalidiinta iyo daryeelayaasha

### Kulanka Koowaad

Waa caadi in Dhakhtarka Cilmi-Nafsiga Waxbarashada (EP) uu kula kulmo si uu kaagala hadlo waayaha ilmahaaga, wixii walaac ah oo aad qabto, waxa si fiican uga socda guriga iyo dugsiga iyo waxyaabaha wax u tari kara ilmahaaga badqabkiisa jireed iyo maskaxeed iyo waxbarashadiisa. Arrintaan waxaa la samayn karaa xilliga kulanka dib u eegista ee lagu qabto dugsiga ilmahaaga.



EP-yadu waxay inta badan la shaqeeyaan adiga, shaqaalaha dugsiga iyo xirfadlayaasha kale (haddii ay ku lug leeyihiin) oo doorka ugu weyn ee EP-yadu waa inay macno u sameeyaan waxa ku dhacaya ilmahaaga iyo inay gacan ka gaystaan qorsheynta tallaabooyinka xiga.

### Wax badan ka ogow...

Waxay noqon kartaa in macluumaad dheeraad ah loo baahdo si loo fahmo meelaha uu ku wanaagsan yahay ilmahaaga iyo meelaha uu dhibaatooyin ka qabo. Si wadajir ah ayaan ugu heshiin doonaa waxa loo baahan yahay in la sameeyo iyo cidda samayn doonta – ciddaas waxay noqon kartaa dugsiga, xirfadle kale ama EP-ga. Haddii cidda hawsha fulinaysa ay noqdaan EP-yada, waxaa laga yaabaa inay indha-indhayn ku sameeyaan ilmahaaga intuu joogo dugsiga (tusaale ahaan, fasalka ama garoonka ciyaaraha), inay wadahalalo badan la yeeshaan shaqaalaha dugsiga ama adiga naftaada, ama inay hawlo gaar ah ama qiimayn la sameeyaan ilmahaaga. EP-ga ayaa caadi ahaan la kulmi doona ilmahaaga si uu u fahmo aragtidooda ku aadan xaaladdooda iyo waxa ay jeclaan lahaayeen in laga caawiyo.



### Qorshaynta

Iyadoo la isticmaalayo macluumaadka la soo ururiyey, EP-ga wuxuu caadi ahaan la kulmi doonaa adiga iyo shaqaalaha dugsiga si aad ula timaadaan isfaham aadan baahiyaha ilmahaaga iyo si aad si wadajir ah ugu heshiisaan tillaabooyinka xiga ee lagu caawinayo ilmahaaga. Dugsiga ayaa inta badan waxa uu arrintaan ku dari doonaa qorshaha waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga.




### Dib u eegis

Waxa laga yaabaa in EP-ga uu mar kale la kulmo adiga iyo dugsiga (sida caadiga ah 6 toddobaad kadib) si dib u eegis loogu sameeyo qorshaha. Waxay noqon kartaa in fikir dheeraad ah ama macluumaad dheeraad ah loo baahdo si loo cusboonaysiiyo qorshaha si loo xaqiijiyo in taageerada la meeleeeyey ay tahay mid waxtar leh.



### Diiwaanka Qoran

Guudmar/warbixin qoraal ah ayaa la bixiyaa marka shaqo toos ah uu qabto EP-ga. Tani waxay qeexaysaa shaqada ay qabteen, dareenka la wadaago ee ku aadan waxyaabaha uu ilmahaaga ku wanaagsan yahay iyo baahiyahiisa iyo qorshaha taageerada ee lagu heshiiyey. Arrintaan ayaa sida caadiga ah lagaala hadlaa adiga inta ay hawsha socoto si aanan u jirin macluumaad cusub oo aan adiga ka warhayn. Haddi EP-yadu ay ka qeybgalayaan kulanka dib u eegista dugsiga, dugsigu waxa uu inta badan bixin doonaa diiwaanka qoran ama qorshaha waxbarashada shaqsiga ee la cusboonaysiiyay ama qorshaha taageerada waxbarashada.



Taleefan: 020 8379 2000  
limayl: EPS@enfield.gov.uk

@ENFIELDEPS

[www.enfield.gov.uk](http://www.enfield.gov.uk)